



XAASHI MURTIYEEDKA U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

SIDA LOOGU DIYAAR GAROORO DAAD

Daadadku waxay dilaan dad Maraykan ah in ka badan musiibo kasta oo kale oo dabiici ah, waa khatarta cimilo ee Lambar 1 Bartamaha Ohio. Ka sakow roob badan oo da'ay daadadka waxaa sababa baraf dhalaalaya iyo webiyo, laago, iyo farraqyo biyo-keen ah. Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin waxay bixisay xogta soo socota oo ku saabsan daadadka si adiga iyo qoyskaaguba aad u bedbaaddaan.

Khataraha Daadadka:

- Lix inji keliya oo biyo xawli ku socda ah ayaa dadka dhinac u tuuri kara.
- Baabuurto way dabbaalan oo heehaabi haddii ay biyuhu gaaraan ilaa laba fiid.

Ka sii horreynta Daadka:

- Faham eray bixinta daadadka sida daad dhawr, digniin daad, iyo digniin daadad xawli ah. Xog badan ka hel meeshan www.floodsmart.gov.
- Dhawr dariiqood ku baxsato sii qorshayso.
- Booqo qaybta daadadka ee websaytka FEMA si aad u ogaato halistaada; halkan www.fema.gov.
- Digniino daad kala soco raadiyayaasha NOAA ee cimilada.
- Ka fogow meelaha daadadka u nugul, hana ka yeelin in carruurto ku ciyaarto farraqyada iyo daad-qaadda agtoda.

Daad Xawli ah:

- Tag meel sare markiiba, lugee hadday muhiim tahay.
- Gaari abid ha ku kaxayn aagagga daadku ka jiro.

Daad Ka Dib:

- Guriga ku noqo keliya markay madaxdu waa nabad tiraahdo ka dib.
- Dhegayso wararka si aad u ogaato in sahayda biyaha ee bulshada weli la cabbi karayo.
- Samee haamaha biyaha ee wax gareen, barkadaha baraagaha, iyo habdhiska shilin bixinta sida ugu dhaqso badan ee suuroggalka ah. Habka qashin qaadka oo jugi gaartay waa halis caafimaad oo khatar ah.
- Nadiifi oo sifee wax kasta oo qoyey.

Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin, oo ah hay'ad dawli ah oo maxalli ah, waxay agaasintaa qorshaynta, tacliiminta, digniinta, waxqabadka iyo ka kabashada gurmada/musiibo ee degmadan oo dhan si ay u yarayso raadreebka xun ee ku iman kara dadka deggan meeshan iyo hantidooda

Waxaa bixiyey deeq 2008 UASI waxaana la cusboonaysiiyey Oktoobar 2010

Xog Bulsho oo Gurmada oo ka Timid: (Emergency Public Information From:)

Franklin County Emergency Management and Homeland Security
5300 Strawberry Farms Blvd., Columbus, Ohio 43230
Phone 614-794-0213, Fax 614-882-3209
Email fcem&hs@franklincountyohio.gov
On the Web at www.franklincountyohio.gov/emahs/